

Waa maxay Title 1 maxayse tahay faa'iidooyinka inaad ka mid noqoto Title 1-ka iskuulka?

- Title 1 waa dhaqaale ama maaliyad iskuulada la siiyo oo loogu talagalay daboolida baahida ardayda. Xogta qiimaynta waxaa loo isticmaalaa si looga'aamiyo baahida ardayga iyo ka hortaga waxqabad.
- Lacagta Title 1-ka waxaa loo isticmaalaa siyaabooyin badan oo ay ka mid yihiin:
Macalimiin dheeraad ah oo taageeraya himilooyinka iskuulka oo dhan
Tiknoolajiyada iyo qalabka ardayga ka taageeraaya waxbarashada
Kobcin xirfadeed iyo tababare macalimiinta loogu talagalay
Xisaab, akhris iyo qoraal heerar kala duwan oo macalimiinta u ogolaanaya inay
Imo kasta ku baraan heerkooda shakhsi ahaaneed iyo baahidooda

Sideen kuula wadaagnaa ama kuugu soo sheegnaa macluumaadka waalidiinta/masuulada?

- Qorshaha Waalidka iyo Qoyska
- Dhacdooyinka dugsiga
- Shirarka Waalidiinta iyo Macalimiinta
- Websaytka (website) iskuulka, joornaalka, cod telefoon mise qaababka kale ee warbaahinta bulshada

Waa maxay Qorshaha Waalidka iyo Qoyska?

- Qorshaha Waalidiinta iyo Qoyska waa warqad loo isticmaalaayo in lagu taageero iskaashiga u dhexeeya iskuulka iyo waalidiinta si kor loogu qaado guusha ardayga.
- Macluumaadka waxaa la ururiyaa sanad dugsiyeedka oo dhan iyadoo loo marayo qaabab kala duwan sida sahano, kulano, iyo ka faaloodka dhacdooyinka iskuulka.
- Haddii aad jeclaan lahayd inaad ka qaybqaadato horumarinta qorshaha sanadlaha ah, la soo xiriir hogaamiyaha Barnaamijka Title 1-ka
- Qorshaha Waalidka iyo Qoyska wuxuu ku yaalaa boga iskuulkeena.
- Faalooyin qoran oo ku saabsan Qorshaha Waalidka iyo Qoyska waxaa lala wadaagi karaa maamulaha iskuulka.

Macluumaadka loogu talagalay waalidiinta waxaa laga heli karaa boga Title 1 ee boga iskuulkeena.

Wixii macluumaad dheeraad ah, xor ayaad u tahay inaad la soo xiriirto iskuulka oo waydiiso
Qofka ku shaqo leh Title 1-ka